# Lambar cusub ayaa la siiyaa dhibanayaasha dagaalka qoyska dhex mara

## Miiska ku jira


Sidee ayaa loo codsadaa lambar cusub? 2

Bedelidda Magaca Kuugu Qoran kaarka 3

Keenitaanka cadeeynta lagaa doonayo 3

Ka joojinta in diiwaankaaga la arko 3

La Xiriirka Lambarka Bulshada 3


Qof kasta ayaa noqon kara dhibane dagaal qoyska dhex mara. Haddii aad tahay dhibane dagaalka qoyska dhex mara, qashqashaad, xadgud, ama xaalad khatar gelineysa naftaada, waxaa suurtagal in Lambarka Bulshada ay ku caawin karaan.

Wacyi gelinta dadweynaha ayaa lagu sheegay sida ay muhim u tahay in dhibanayaashu sameystaan qorshe amaan oo ay ka mid tahay in ay urursadaan aqoonsiyada oo doortaan meel amaan oo ay tagaan. Mararka qaarkood, sida ugu wanaagsan ee looga badbaado qofka dhibka geysta loona yareeyo khatarta waa adiga oo ka guura sameystana aqoonsi cusub. Haddii aad sidaas doorato, in aad sameysato lambar cusub waa laga yaabaa in ay ku caawiso.

Inkasta oo Lambarka Bulshada aanay dabeecad u aheyn inuu dadka ka bedelo lambarka, laakiin waynu bedelnaa marka ay jirto caddeyn muujneysa in qof lagu xadgudbay ama noloshiisu khatar ku jirto.

In aad lambar cusub codsato waa go'aan aad u weyn. Awooda aad u leedahay in aad la xiriirto hay'adaha dawladda dhexe iyo gobolka, goobaha shaqada, iyo kuwo kalaba way ogaanayaan; bangiyada, shaqada, iyo diiwanada kale lambarkaagii hore iyo magacaaga ayaa ku qornaanaya (haddii aad bedesho magacaaga). Haddii aad fileyso in aad magacaaga, fadlan sidaa yeel ka hor inta aadan codsan lambar cusub.

## Sidee ayaa loo codsadaa lambar cusub?

Waxa aad ku codsan kartaa adiga oo Xafiiska Lambarka Bulshada taga. Waxaanu kaa caawineynaa in aad qorto odhaah aad ku sharxayso sababta aad ugu baahan tahay lambar cusub iyo codsiga lambarka cusub. Waxaa intaa dheer in lagaa doonayo in aad soo gudbiso:

- Caddeyn muujineysa qashqashaadda laguu geystay, dayaca, xadgudubka iyo waxyaabaha kale ee naftaada khatar galinaya.
- Lambarkaaga Bulshada ee iminka aad leedahay;
- Caddeyn muujineysa:
  — Dhalashada Mareykanka ama Sharciga aad wadanka ku joogto
  — Da'da; iyo
  — Warqadda aqoonsiga.
- Cadeyn muujineysa in aad magacaaga si rasmi ah aad u bedeshay haddii aad bedeshay.

Waxaa sidoo kale, lagaa doonayaa in aad keento qoraal caddeynaya in ilmaha aad u codsaneyso lambarka cusub uu kula nool yahay iyo caddeyn muujineysa dhalashadooda Mareykanka, da'da iyo aqoonsiga.

***Aqoonsiyada oo dhan waa in ay noqdaan asalkii ama nuqul laga soo shaabadeeyey hay'adda soo saartay. Ma ogolaaneyno nuqul ama nuqul leh shaabadda xaqiijiyaha (nootari)***. Waxaa laga yaabaa in aan hal qoraal ama aqoonsi u adeegsano labo ujeeddo. Tusaale ahaan, waxaa suurtagal in aan baasaboorkaaga u adeegsano aqoosni ahaan iyo caddeyn dhalashada ah. Ama, aan u adeegsano shahaadada dhalashada caddeyn da'da iyo dhalashada. ***Hase yeeshee, waa in aad keentaa ugu yaraan laba aqoonsi***.

Boostada ayaa laguugu soo dirayaa lambarkaaga iyo kaarka sida ugu dhaqsaha badan ee aan u helno macluumaadka oo aan ka xaqiijino aqoonsiyadaada xafiiska soo saaray.

## Dhalashada ama sharciga aad wadanka ku joogto

Dhalashada Mareykanka: Waxa aan ogolnahay dokumeentiga qaarkiis oo kaliya inay cadeyn u noqon karaan heysashada dhalashada waddanka.Taas waxaa ka mid ah shahaadada dhalashada ama baasaboorka Mareykanka.

Dadka aan heysan dhalashada: Si aad u cadeyso sharciga aad waddanka Mareykanka ku joogto, waa in aad keentaa aqoonsiga socdaalka sida I-94, *Diiwaanka Gelitaanka Bixitaanka*, caddeyn muujineys ogolaanshaha waddanka ama ogolaanshaha shaqada, *Aqoonsiga shaqada* (EAD, *ogolaashaha shaqada*). Ardayda heysata F-1 ama M-1 waa in ay soo bandhigaan Foomka I-20, *Certificate of Eligibility for Nonimmigrant Student Status* (*Caddeynta Ogolaanshaha Shaqada ee Ardayda Ajnabiga Ah*). Sifaddii aad ku timid fiisaha J-1 ama J-2 ee is weydaarsiga booqashada, waxa kale oo lagaa doonayaa in aad na tusto DS-2019, *Certificate of Eligibility for Exchange Visitor Status*.

## Da'da

Ku dhashay Mareykanka: Waxaa waajib kugu ah in aad keento shahaadada dhalashada haddii ay jirto. Haddii aadan heysan shahaadada dhalashada, waxaa suurtagal ah in aan ogolaano;

- Caddeyn xaga is diiwaan gelinta diinta oo la sameeyey intii aadan 5 sano jir noqon marka laga soo bilbaabo taariikhda dhalashada;
- Diiwaanka dhalashada ee cisbitaalka aad ku dhalatay ee Mareykanka; ama
- Baasaboorka Mareykanka

Ku dashay wadamada dibadda: Waxaa waajib kugu ah in aad keento shahaadada dhalashada ee wadamada kale haddii aad heysato ama ku heli karto 10 cisho gudahood. Haddii aadan shahaadada heli karin, waxaa suurtagal ah in aan ogolaano:

- Baasaboorka wadamada dibadda;
- I-551, kaarka deganaanshaha rasmiga ah;
- I-766, Warqadda Ogolaanshaha Shaqada (*EAD*, ogolaanshaha shaqada) ee ay soo saartay DHS; ama
- I-94 Diiwaanka gelitaanka/bixidda.

**Aqoonsiga:**

Waxa aan ogolnahay dokumeentiga qaarkiis oo kaliya inay cadeyn u noqon karaan in lagugu aqoonsado. Aqoosiyadaas waa in ay noqdaan kuwo aan taariikhdoodu dhamaan (dhicin) magacaaga, waxyaabaha lagugu aqoonsan karo iyo sawirkaagana la socdo.

Dhalashada Mareykanka: Lambarka Bulshada waxa ay ku weydiisanayaan Ogolaanshaha wadidda gaadiidka, aqoonsiga gobolka ee aan aheyn wadidda gaadiidka ama Baasaboorka Mareykanka aqoonsi ahaan. Haddii aadan heysan aqoonsiyada aan ku weydiino, waxaan ku weydiisan karnaa aqoonsiyo kale oo ay ka mid yihiin:

- Shahaadada dhalashada;
- Shahaadada Jinsiyadda Mareykanka
- Aqoonsiga shaqada;
- Aqoonsiga kaarka dugsiga;
- Kaarka caafimaadka (ma aha kan Medicare); ama
- Aqoonsiga ciidamada gaashaandhigga.

Dadka aan heysan dhalashada: Lambarka Bulshada Aqoonsiyada la ogol yahay waxa ka mid ah:

- I-551, kaarka deganaanshaha rasmiga ah; ama
- I-94, Foomka I-94 oo aad ku lifaaqday baasboorka aan dhicin , ama
- I-766, Warqadda Ogolaanshaha Shaqada (*EAD*, ogolaanshaha shaqada) ee ay soo saartay DHS.

## Bedelidda Magaca Kuugu Qoran kaarka

Waan ogolaaneynaa haddii uu jiro amar maxkamadeed oo lagu bedelayo magacaaga oo taageeraya magaca aad codsaneyso.

## Keenitaanka cadeeynta lagaa doonayo

Cadeynta ugu wanaagsan ee xad gudubka laguu geysto waa mid ay sheegaan dadka kale sida booliiska ama shaqaalaha caafimaadka oo ay faahfaahiyaan dhibta ku soo gaartay , xadgudubka iyo sida noloshaadu khatar ugu jirto. Cadeymaha kale waxaa ka mid noqon kara amarka kala fogeynta ee maxkamadda, warqadaha goobaha dadka la geeyo, ama qof kale oo aqoon hoose u leh dagaalka qoyska dhex mara iyo xadgudubka.Waanu ka caawineynaa sidii aad ku heli laheyd caddeyn dheeraad ah.

## Ka joojinta in diiwaankaaga la arko

Waxa aad dooran kartaa in aan la fiirin karin diiwaankaaga barta internetka.Marka aad sidaa doorato, qofna, adiga xitaa, awood uma yeelaneysid in aad aragto ama aad wax ka bedeli karto xogtaada barta internetka iyo telefoonka. Haddii aad joojiso in diiwaanka la arko, oo aad fikradaada mar dambe bedesho, waad la soo xiriiri kartaa Lambarka Bulshada oo aad weydiisan kartaa in ay ka qaadaan xayiraadda. Soo booqo ***www.socialsecurity.gov/blockaccess*** si aad u joojiso in xogtaada la arki karo.

## La Xiriirka Lambarka Bulshada

Waxaa jira dhawr hab oo loola xiriiri karo Lambarka Bulshada, oo ay ka mid tahay barta internetka, telefoonka iyo in aad tagto xafiiska. Halkan waxa aan u joognaa in aan ka jawaabno su'aalahaaga oo aan kuu adeegno. In ka badan 80, Lambarka Bulshada waxa ay caawiyeen si ay maanta iyo mustaqbalka ugu guuleystaan iyagoo u fidiyey gargaar dhaqaale malaayiin dad ah oo halgan ugu jira nolosha.

**Booqo bartayada internetka**

Sida ugu haboon ee meel kasta loogala soo xiriiro kaaro Lambarka Bulshada waa adiga oo soo booqda ***www.socialsecurity.gov***. Halkaas oo aad:

- Ka sameysan *my* Social Security xisaab oo aad kala socoto *Social Security Statement* (*Warbixinta Lambarka Bulshada*), ka hubiso lacagta aad shaqeysay, aad ka daabacan karto warqada xaqiijinta macaashka, ka bedeli karto lacagta bangiga laguugu shubo, aad ka daabacan karto foomka SSA-1099/1042S iyo kuwo kale;
- Ka codsan karto caawinaad dheeraad ah (Extra Help) ee ku saabsan daawada laguu qoro ee ceymiska caafimaadka ee Medicare;
- Waxa aad ka coddsan kartaa hawlgabka, naafada, iyo macaashka Medicare;
- Aad ka hesho nuqul ka mid ah daabacaadaha aan soo saarno;
- Aad ka hesho jawaabaha su'aalaha markasta la is weydiiyo; iyo
- Iyo kuwo kale oo dheeraad ah!

Adeegyada qaarkood waxa aad ku heli kartaa afka Ingiriisiga oo kaliya. Soo booqo barta Luqadaha kala duwan oo aad macluumaadka ku heli karto Af Soomaali. Waxaanu idiin heli karnaa tarjubaano lacag la'aan ah oo idinka caawin kara waxyaabaha aad uga baahan tihiin Xafiisyada Lambarkaaga Bulshada Waxa aan kuu heli karnaa tarjubaan haddii aad na soo wacdaan ama aad soo booqataan Xafiiska Lambarka Bulshada.

## Nagala soo xiriir

Haddii aadan heli karin internetka, waxaa jirta adeegyo dhameystiran oo aad telefoonka ku heli karto, 24ka saac, 7da cisho ee todobaadka. Nagala soo xiriir telefoonka lacag la'aanta ah ee **1-800-772-1213** ama numberka TTY, **1-800-325-0778**, haddii aad dhagaha la' dahay ama maqalku kugu adag yahay.

Haddii aad dooneyso in qof aad la hadasho, waxa aan telefoonka ka jawaabnaa inta u dhaxeysa 7da aroornimo ilaa 7da fiidnimo Isniinta ilaa Jimcaha. Waxaanu ku weydiisaneynaa in aad dulqaadato mudada aan mashquulsanahay oo telefoonadu badan yihiin ama aad mudo dheer khadka ku jirto. Waxaanu rajeyneynaa on aan kuu adeegno.

### National Domestic Violence Hotline (Khadka Dhibanayaasha Dagaalka Qoyska Dhex Mara ee Qaranka)

**1-800-799-SAFE (7233)**
**(TTY) 1-800-787-3224**

Securing today
and tomorrow

**Social Security Administration**
Publication No. 05-10093-SO | August 2017
Lambar cusub ayaa la siiyaa dhibanayaasha dagaalka qoyska dhex mara
New Numbers for Domestic Violence Victims (Somali)
Produced and published at U.S. taxpayer expense
Waxaa lagu soo saaray oo lagu daabacay lacagta canshuur bixiyayaasha